

## Dhismayaasha

Guud ahaan, guryaha Vermont ayaa ka mid ah kuwa ugu da'da weyn dalka. Guryaha qadiimka ah inta badan waa kuwo qabyo ah sidaas darteedna waa qaali in la kululeeyo. Waxa kale oo laga yaabaa inay leeyihiin habab kuleyl oo da'weyn, oo tayadoodu xun tahay. Dhanka kale, dhismayaal tayada lihi waxay isticmaalaan tamar yar si ay u kululaadaan ama uqaboobaan - badbaadinta kiraystayaasha, mulkiilayaasha guryaha, iyo lacagta ganacsiyada.

Waxaa jira siyaabo badan oo Vermonters ay uga dhigi karaan dhismayaasheena kuwo koronto iyo qarash yar lagu kulaylin karo laguna qaboojin karo, taas oo yareyneysa wasakhawga cimilada islamarkaasi. Tallaabooyinku waxaa ka mid ah agabka lagu daboolo daldaloolada guryaha (weatherstripping and caulking) ilaa dib-u-habaynta tamarta si buuxda iyadoo lagu dahaarayo kul celiyo tayadiisu fiican tahay. Waxaan u wareegi karnaa hababka kuleylinta ee ku tiirsan korontada, taas oo nadiif ah, kana imanaysa ilaha dib loo cusboonaysiin karo innagoo ka guurayna saliidda ama gaaska. Intaa waxaa dheer, casriyayntan ayaa ka dhigaysa guryaheenna kuwo raaxo ah, caafimaad uleh dadka ku nool, iyo kuwo la awoodi karo kulaylintooda iyo qaboojintooda.

### Faa'iidooyinka guryaha, iyo dhismayaasha korontada yar adeegsada

#### Guryo caafimaad uleh dadka ku dhex nool

Guryo caafimaad uleh dadka ku dhex nool


#### Guryo Raaxo leh

Qabow yar xilliga jiilaalka iyo huur yar xilliga xagaaga.

#### Lacagta la Kaydiyay

Guryaha si fiican loo dahaaray waxay ubaahdaan koronto yar iyo qarash yar marka ay noqoto kulaylintooda iyo qabawgooda. Isticmaalka bamka kuleyliyaha ee korontada ku shaqeeya waa uu ka qarash yaryahay ku kulaylinta saliidda ama gaaska.

Eeg dhinaca kale barnaamijyada kharash la'aanta ah iyo gunnooyinka loogu talo galay casriyaynaha noocan ah.



# Waa maxay waxyaabaha la heli karo si loo yareeyo lacagta ku baxda kuleylinta iyo qaboojinta gurigayga?

Iskaan garee si aad wax uga ogaato barnaamijyadan iyo waxyaabo kale oo badan



## Barnaamijka Guryaha Loogu Diyaarinayo Cimilada Adag

Waxa uu siiyaa adeegyo lagu baadhayo tamarta guriga oo kharash la'aan ah gurigana loogu diyaarinayo cimilooyinka adag (sida dahaarka iyo daboolista daldaloolada guriga) qoysaska dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa dhexdhexaadka ah iyada oo loo marayo 5 ururada waxqabadka bulshada ee heer gobol:

- Xarunta Fursadaha Gobolka ee Bennington (Bennington Regional Opportunity Center)
- Waxqabadka Bulshada ee Capstone (Capstone Community Action)
- Xafiiska Fursada Dhaqaale ee Champlain Valley (Champlain Valley Office of Economic Opportunity)
- Ururka Shaqaalaysiinta iyo Tababarka ee Northeast (Northeast Employment and Training Organization)
- Waxqabadka Bulshada Koonfur-bari ee Vermont (Southeastern Vermont Community Action)

## Barnaamijyada Yaraynta Isticmaalka Tamarta (Energy Efficiency Programs)

Adeegyadani waxay bixiyaan adeegyo yaraynta tamarta la istimcaalayo iyo gunnooyin loogu talo galay mulkiilayaasha guryaha iyo ganacsiyada Vermont.

- Efficiency Vermont (oo loogu talo galay qof kasta oo Vermont jooga) 888-921-5990
- Waaxda Korontada ee Burlington (oo loogu talo galay macaamiisha) 802-865-7362
- Nidaamyada Gaaska ee Vermont (oo loogu talo galay macaamiisha) 802-863-4511



## Codkaaga ayaa muhiim ah!

Vermonters waxay durba dareemeen saameynta isbedelka cimilada iyadoo jiilaaladu gaabteen, xagaagu kululaaday, abaaro, iyo fatahaado dheceen. Qorshaha Waxqabadka Cimilada wuxuu soo jeedinayaa talooyinka hoos loogu dhigayo gaaska aqalka dhirta lagu koriyo (greenhouse gases) wuxuuna taageerayaa bulshooyinka si ay ula qabsadaan isbeddelka cimilada. Xafiiska Waxqabadka Cimiladu waxa uu rabaa in uu ogaado: waxqabadyada Gobolka ee wax lagaga qabanayo isbeddelka cimilada kuwee ayaa adiga muhiim kuu ah?

**XAFIISKA WAXQABADYADA DHANKA  
CIMILADA EE VERMONT**

La xidhiidh: [anr.cao@vermont.gov](mailto:anr.cao@vermont.gov)

Wax badan ka ogoow: [www.climatechange.vermont.gov](http://www.climatechange.vermont.gov)

 **VERMONT**  
**AGENCY OF NATURAL RESOURCES**